# MAXKAMADDA SARE EE COLORADO

### XAFIISKA GUDOOMIYAHA GARSOORKA

## WAAXDA GARSOORKA COLORADO
## Hagaha La Xidhiidhka Turjubaanada Luuqadda iyo Galaangal U Helitaanka Maxkamadaha ee Shakhsiyaadka ay Xaddidan Tahay Aqoontooda Ingiriisidu

Hagahan waxa loo abuuray in lagu hirgeliyo siyaasadaha la xidhiidha adeegsiga iyo kharash siinta turjubaannada luuqadda ee ay bixiyaan isla markaana ay diyaariyaan maxkamadaha gobolka ee Colorado iyada oo lasoo mariyo Xafiiska Galaangal U Helidda Luuqadda ("Ola") iyo in lagu maamulo galaangal u helidda dacwadaha maxkamadda iyo hawgallada maxkamadda ee shakhsiyaadka ay yar tahay aqoontooda Ingiriisidu.

## I. QEEXITAANADA

**I. A. Adeegyada Luuqadda –** Fudaydinta galaangal u helidda adeegyada maxkamadda ee loo marayo kaalmada turjumaan, shaqaale laba luuqadle ah, ama qaabab fasiraad.

**I. B. Aqoonta Ingiriisida ee Xaddidan ("LEP")** – Shakhsiyaadka aan ku hadal Ingiriisida ee aanay ahayn luuqaddooda hooyo iyo kuwa awoodda yar u leh akhrinta, ku hadalka, qorista, ama fahanka Ingiriisiga.

**I. C. Dacwadaha Maxkamadda** – Dhegaysi, dacwad ama hor imaad kale oo looga hor yimaaddo maxkamad gobolka Colorado ah dacwad, racfaan, ama dacwad kale, oo ay kamid yihiin wixii arrin ah ee uu qabto masuul garsoor.

**I. D. Dhibbane –** Qofkasta oo dhibbane u ah faldembiyeed la sheegtay; sida wakiilka, masuulka sharciyeed, daryeelaha, ama xubin qoyska dhaw ah oo uu ka tegey qofku haddii qofkaasi uu dhintay; iyo waalidka, masuulka sharciga ah, ama daryeelaha haddii qofkaasi uu yahay ilme ama talaxgab.

**I. E. Dhinac Daneeye ah** – Dhinac kiis; dhibbane; markhaati; waalid, masuul sharciyeed, ama haye dhinac ah ilme; iyo masuulka sharciyeed ama hayaha dhinac ah qof weyn.

**I. F. Fasiraad** – Wareejinta saxda ah ee dhamayska tiran ee farriin qoraal ah ee laga wareejinayo luuqad loona wareejinayo luuqad kale si toos ah.

**I. G. Hawlgallada Maxkamadda** – Xafiisyada maxkamadaha, adeegyada, iyo barnaamijyada ay maareeyaan ama ay qabtaan maxkamadaha iyo baroobeeshinku, ee aanay ku jirin dacwadaha maxkamadda, taas oo ay kamid tahay xidhiidh lala yeesho dadweynaha ama dhinacyada ay khusayso

**I. H. Madax Garsoor** – Qaadi, xaakin kiisaska waaweyn ah, xaakin kiisaska yaryar ah, ama xaakin arrimaha biyaha ah oo loo igmaday in uu gadhwadeen ka noqdo dacwad maxkamadeed.

**I. I.** **Shaqaalaha Laba Luuqadlayaasha ah** – Shaqaale kamid ah Waaxda Garsoorka ee Colorado aan ahayn tujubaanka luuqadda ee ah shaqaalaha gaarka ah kaas oo muujiyey aqoon wanaagsan oo uu u leeyahay Ingiriisida iyo luuqad labaad si waafaqsan heerarka ay dejisay OLA isla markaana ay u ogolaatay OLA in uu shaqo hawlgallada maxkamadeed ah uu si toos ah ugu la qabto shakhsiyaadka ay xaddidan tahay aqoontooda Ingiriisida luuqad aan ahayn Ingiriisi.

**I. J.** **Turjubaad** – Wareejinta saxda ah ee dhamayska tiran ee farriin afka ah ee laga wareejinayo luuqad loona wareejinayo luuqad kale si toos ah.

**I. K.** **Turjubaanka Aqoonta Leh** – Turjubaan luuqadeed kaas oo hirgeliyey aqoonta imtixaanka wanaajinta ee afka ah ee la heli karo ee ugu sareysa oo luuqaddiisa ah isla markaana fuliyey shuruudaha dheeraadka ah ee lagu qeexay heerarka ay dejisay OLA.

**I. L.** **Turjubaanka Diiwaangashan** – Turjubaan luuqadeed oo la ogolaaday kaas oo aan haysan shahaado, caddeyn aqooneed ama khibrad. Shahaadada ama caddeynta aqoonta waxa dhici karta in laga helo ama aan laga helin isku dhafka luuqadda(ha) ee turjubaankan.

**I. M.** **Turjubaanka La Ogolaaday** – Turjubaan shahaado haysta, aqoon leh, khibrad leh ama diiwaangashan kaas oo ay u ansixisay OLA in uu noqdo qardaraasle madax bannaan ama shaqaale gaar ah, isla markaana ku jira liiska shaqaalaha shaqada ku jira ee ay hayso OLA oo loo diyaariyo si waafaqsan tilmaamaha OLA.

**I. N.** **Turjubaanka Luuqadda ee ah Qandaraaslaha Madaxa Bannaan** – Turjubaan luuqadeed oo la ogolaaday kaas oo ah qandaraasle madax bannaan sida uu dhigayo heshiisku ama sida lagu qeexay xukunka Dakhliga ee IRS 87-41.

**I. O.** **Turjubaanka Luuqadda ee ah Shaqaalaha Gaarka ah** – Shaqaale shaqadiisa ay maamulaan Shuruucda Shaqaalaha Nidaamka Garsoorka Colorado isla markaana qaybta shaqadiisu ay hoos tagayso qorshaha kooxaynta iyo magdhawga Waaxda.

**I. P.** **Turjubaanka Shahaadada Haysta** – Turjubaan luuqadeed kaas oo buuxiya heerarka wanaajinta xirfadeed ee ugu yar, ka hirgeliyey dhibco gudbitaan imtixaanka shahaadada ee afka ee ay aqoonsan tahay Waaxda Garsoorka Colorado, isla markaana ku jira liiska turjubaannada shahaadada haysta ee shaqada ku jira ee ay hayso OLA ee la soo dhigay websayt ka Garsoorka Colorado.

**I. Q.** **Turjumaadda Fogaanta ah** – Hannaan uu turjubaanku gacan ka geysanayo dacwadda maxkamadda ama hawlgalka maxkamadda isaga oo aan jidh ahaan joogin, balse taas beddelkeeda soo xaadiraya isaga oo adeegsanaya haadhweer iyo/ama softiweer talafooneed ama maqal iyo muuqaal.

**I. R.** **Turjumaan Khibrad Leh** – Turjumaan luuqadeed kaas oo aan helin shahaado ama caddeyn aqooneed, balse buuxiyey shuruudaha dhibcaha tababarka iyo imtixaanka shahaadada afka ah ee ugu yar ee ay u dejisay OLA kaas oo loo tixgelin doono hawlaha turjubaadda ee maxkamadda marka aan la heli karin turjubaan shahaado ama caddeyn aqooneed haysta. Turjubaannada khibradda leh waxa ay ku qoran yihiin liiska turjubaannada khibradda leh ee shaqada ku jira ee ay hayso OLA.

## II. MAGACAABISTA TURJUBAANNADA LUUQADEED

**II. A. Dacwadaha Maxkamadda** – Si waafaqsan Cinwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 ("Cinwaanka VI"), Xeerka Dhamayska Tiran ee Xakameynta Faldembiyeedka iyo Waddooyinka Ammaanka ah ee 1968 ("Xeerka Waddooyinka Ammaanka ah"), iyo Amarka Fulinta 13166, 65 Fed. Duwaanka 50121 (Ogoosto 16, 2000), maxkamaduhu waxa ay u magacaabi doonaan isla markaana ka bixin doonaan kharashka turjubaad luuqadeed dhammaan dhinacyada daneeyeyaasha ah muddada lagu gudo jiro ama dheeraadka ka ah dacwad maxkamaddeed, oo ay kamid yihiin:

1. Fududeynta xidhiidhka ka baxsan muddada uu joogo masuulka garsoorku si loogu sahlo dacwadda maxkamadda inay u socoto sidii loo qorsheeyey, oo ay kamid yihiin shirarka dacwadda ka horreeya ee dhexmara eedaysanayaasha iyo qareenada degmada si markaa si dhakhso ay ugu soo gudbiyaan bandhigga qiraalka kahor inta aanay hor iman maxkamadda ama si ay uga wada hadlaan sii wadis;
2. Fudaydinta xidhiidhka dhex mara macmiilka iyo qareenka uu maalgeliyey gobolku ee loo magacaabay si waafaqsan Hagayaasha Gudoomiyaha Garsoorka 04-04 iyo 04-05;
3. Fudaydinta xidhiidhka dhinacyada daneeyeyaasha ah ku dhex mara barnaamijyada ay waajibisay maxkamaddu oo ay kamid yihiin iyada oo aanay ku xaddidneyn fudaydinada iyo dhexdhexaadinada maxkamadda qoyska; iyo
4. Dhamaystirka qiimeynada iyo baadhitaanada loo amray isla markaana loo qabtay iyada oo ujeedku yahay in maxkamadda laga kaalmeeyo gaadhista go'aanka.

**II. B. Aan ahayn Dhinacyada Ay Khusayso -** Maxkamaddu waxa dhici karta, iyada oo go'aankeeda ku xidhan, inay siiso isla markaana ka bixiso kharashka turjumaadda luuqadda shakhsiyaadka aqoontooda Ingiriisidu ay xaddidan tahay ee aan ahayn dhinacyada ay khusayso ee ay sida tooska ah u saameynayso dacwadda maxkamaddu.

**II. C. Hawlagallada Maxkamadda –** Shaqaalaha maxkamaddu waxa ay galaangal u helid adeegyada luuqadda ah siin doonaan shakhsiyaadka aqoontooda Ingiriisidu ay xaddidan tahay kuwaas oo raadinaya galaangal inay u helaan hawlgallada maxkamadda sida ku qeexan hagahan, iyada oo loo marayo adeegsiga shaqaale laba luuqadleyaal ah ama turjubaanno luuqadeed oo la ogolaaday oo wax u turjubi doona qaab fool ka fool ah ama qaab fogaan ah. Adeegyada luuqaddu waxa ay waafaqsanaan doonaan heerarka OLA taas oo ku xisaabtanta nooca, qaababka, ahmiyadda, iyo muddada xidhiidhka.

**II. D. Xidhiidhada ka baxsan Baaxadda Qaybta II.A iyo II.B. ee Hagahan** – Marka laga reebo sida lagu sheegay Qaybaha II.A iyo II.B, maxkamaddu ma qaban qaabin doonto, bixin doonto ama kharash ka bixin doonto turjubaadda luuqadda muddada lagu gudo jiro iyo inta dheeraadka ka ah dacwad maxkamadeed si ay u fudaydiso xidhiidhka dhex mara qareenada, dacwad-oogeyaasha, ama dhinacyada kale ee la xidhiidha kiis ay ku lug leeyihiin shakhsiyaad LEP ah iyada oo ujeedku yahay ururinta macluumaad taariikheed, baadhis, u diyaargaraw dacwadeed, waraysiyo markhaati, ama ku metelaad macmiil dacwad mustaqbalka ah; wixii ah xidhiidho la xidhiidha adeegyada daaweynta baroobeeshinka; ama wixii ah xidhiidh kale ee aan qayb ka ahayn dacwad maxkamadeed ama wixii dheeraad ka ah sida lagu sheegay Qaybta II.A. Dacwad-oogeyaasha iyo qareenada dhinacyada waxa laga filayaa inay qabanqaabiyaan turjubaad luuqadeed oo loogu talagalay u diyaargarawga kiiska iyo xidhiidhka guud ee ku dhex mara dhinacyada wax ka baxsan dacwadaha maxkamadda

iyaga oo kharashka iska bixinaya iyagu, marka laga reebo sida lagu sheegay CJD 04-04 iyo 04-05.

**II. E. Tujubaannada La Ogolaaday** – Keliya OLA ama wakiiladeeda ayaa loo ogol yahay inay magacaabaan turjubaanno luuqadeed. Maxkamaddu keliya waxa ay bixin doontaa kharashka adeegyada turjubaanada luuqadeed ee la ogolaaday ee ay magacawday OLA ama wakiiladeedu.

## III. QOONDEYNTA TURJUBAANNADA SHAQAALAHA

Xafiiska Masuulka Maxkamadda Gobolka ayaa masuul ka noqon doona u qoondeynta turjubaannada luuqadda shaqaalaha ee gaarka ah degmo garsooreedyada si waafaqsan Qorshaha Qoondeynta *FTE ee OLA ee Ku Beegan Turjubaannada Luuqadeed*. Iyada oo uu hore u ansixiyo Masuulka Maxkamadda Gobolku moojee, laga bilaabo 7/1/11 dhammaan turjubaannada laga shaqaaleysiiyey dhawaan jagooyina gaarka ah waa la ansixin doonaa. Turjubaannada qandaraasleyaasha ah ee shaqaalaha aan garsoorka ahayn ee dheeraadka ah waxa dhici karta in loogu shaqaaleysiiyo hadba sida loogu baahdo iyada oo loo marayo qaab qanadaraas oo madax bannaan iyada oo la adeegsanayo foomka qandaraaska *Heshiiska Qandaraaslaha Madaxa Bannaan - Turjubaan Luuqadeed*.

## IV. WAXYAABAHA LAGU XULANAYO TURJUBAANNADA LUUQADEED

**IV. A.** Maxkamaddu uma ogolaan doonto qof aan ahayn turjubaan luuqadeed oo la ogolaaday in uu ka noqdo turjubaan luuqadeed dacwad ama hawlgal maxkamadeed, iyada oo aan la eegayn meesha turjubaanku uu ka mushahar qaadanayo ama qaabka turjubaanku u hor imanayo maxkamadda.

**IV. B.** OLA ayaa go’aamin doonta kuwa ay yihiin turjubaannada shahaadada haysta, aqoonta leh, khibradda leh, ama diiwaangashan. OLA ayaa hayn doonta liisaska hadda ee dhammaan turjubaannada la ogolaaday oo ay ku jiraan heerkooda khibradeed iyo helitaan. OLA ayaa xaqiijin doonta in liisaska haddu ay diyaar u yihiin maxkamadda iyo dadweynaha. Turjubaannadu waxa ay saxeexi doonaan qiraal la xidhiidha waajibaadkooda hoos yimaadda CJD 05-05, Siyaasadda Waxbarashada Sii Socota iyo Nidaamka Xirfadeed ee Turjubaannada iyada oo shardi u ah ansixinta.

**IV. C.** Maxkamaddu waxa ay u adeegsan doontaa turjubaanno shahaado ama caddeyn aqooneed haysta marka loo heli karo luuqadda loo baahan yahay dhammaan dacwadaha maxkamadda. OLA waxa ay u magacaabi kartaa turjubaannada la ogolaaday inay maxkamadda u hor yimaaddaan tujubaad fool ka fool ah ama si onleyn ah sida soo socota:

1. Maxkamadaha ay 5 ama wax ka badan oo turjubaanno shahaado ama caddeyn aqooneed haysta oo luuqadda loo baahan yahay ah ay degan yihiin meel ugu badnaan 25 mayl u jirta maxkamadda waxa ay u adeegsan doonaan turjubaanno luuqadeed oo shahaado ama caddeyn aqooneed haysta dhammaan dacwadaha u baahan turjubaad in lagu sameeyo luuqaddaas.
2. Dhammaan maxkamadaha kale waxa ay adeegsan doonaan turjubaanno shahaado ama

caddeyn aqooneed haysta inta lagu gudo jiro dhammaan dacwadaha faldembiyeedyada waaweyn ee heerka 1 ah, taas oo ay shardi u tahay in turjubaanka shahaadada ama caddeynta aqooneed haysta ee luuqadda loo baahan yahay ah uu degan yahay ama ka shaqeeyo Colorado.

3. Dhammaan dacwadaha kale, maxkamaddu waxa ay adeegsan doontaa turjubaan shahaado ama caddeyn aqooneed haysta haddii ay heli karto, loo ogol yahay in uu ka shaqeeyo xad-garsooreedka maxalliga ah, isla markaana aan ansixinta looga la noqon si waafaqsan Qaybta IX ee hagahan.
4. Marka turjubaan shahaado ama cadeyn aqooneed haysta la heli waayo, maxkamaddu waxa ay adeegsan kartaa turjubaan ku qoran liiska turjubaannada khibradda leh ee shaqada ku jira ee ay hayso OLA.
5. Haddii turjubaan luuqadeed oo haysta shahaado, cadeyn aqooneeed ama khibrad leh la heli waayo, maxkamaddu waxa ay adeegsan kartaa turjubaan diiwaangashan. Turjubaanada diiwaangashan waxa keliya la adeegsan karaa marka ay yihiin xalka u dambeeya.

## V. MAGACAABISTA WAX KA BADAN HAL TURJUBAAN LUUQADEED

**V. A.** Marka aanay jirin duruufo adagi, maxkamaddu waxa ay u magacaabi doontaa isla markaana kharashka bixin doontaa laba ama wax ka badan oo turjubaanno ah inta lagu gudo jiro noocyada dacwadaha ah ee soo socda si looga hortago in uu daalo turjubaanku isla markaana ay timaaddo waayitaanka saxnaanta turjubaadda ee la xidhiidha:

1. Dacwadaha loo qorsheeyey inay socdaan muddo 2 saacadood ah ama muddo ka dheer.
2. Dacwadaha leh dhinacyo daneeyeyaal ah oo LEP ah oo badan oo u baahan turjubaad marka tashiga qareenka-macmiilka inta lagu gudo jiro dhegaysigu uu muhiim yahay (sida, marag furka markhaatiga, codsiyada).
3. Dacdawaha ay luuqado badani ku jiraan.

**V. B.** Tilmaamaha iyo xaddidaadaha soo socda ayaa munaasab ku ah adeegsiga wax ka badan hal turjubaan:

1. Adeegsiga qalabka isku wakhtiga wax turjuma ee elektarooniga ah ayaa la dhiirrigeliyaa maadaama oo uu yahay nidaamka ugu wanaagsan ee dhammaan kiisaska, gaar ahaan dacwadaha wakhtigoodu ka badan yahay laba saacadood ee ay ku jiraan dhinacyo daneeyeyaal ah oo LEP ah oo badan. Adeegsigiisa ayaa sidoo kale loo dhiirrigeliyaa si loogu sahlo macaamiisha iyo waalidiinta ama masuullada inay joogaan dacwadaha la turjumay iyaga oo aan u baahneyn turjubaan dheeraad ah.
2. Dacwadaha leh dhinacyada daneeyeyaasha ah ee LEP ah ee badan ee u baahan turjubaad lagu sameeyo hal luuqad, turjubaanka aan si firfircoon uga qaybqaadaneyn bixinta turjubaad isku wakhti ah ayaa loo adeegsan karaa in uu fududeeyo xidhiidhka qareenka-macmiilka marka loo baahdo.
3. Haddii turjubaad luuqadeed loogu baahdo marag furka markhaatiga ee dacwad leh dhinacyo ay khusayso oo LEP ah oo badan, turjubaan saddexaad ayey maxkamaddu u bixin kartaa ujeeddadaas.

4. Turjubaannada waxa qabanaysa dhaarta ilaalinta sirta iyo eex la'aan, iyo inay sida saraakiisha oo kale uga dhaqmaan maxkamadda; sidaas darteed, inay hal turjubaan u adeegsadaan wax ka badan hal dhinac oo daneeye ah kiis waa la ogol yahay.
5. Maxkamadda waajib kuma aha inay u magacawdo turjubaan luuqadeed oo kale marka turjubaan uu hore ugu turjubay inta lagu gudo jiro dacwad maxkamadeed dhinac kale oo kiis.
6. Dhinac kasta oo daneeye ahi waxa uu bixin karaa oo uu qabanqaabin karaa adeegyo turjubaad si uu u fudaydiyo xidhiidhka qareenka-macmiilka ama si kale ugu kaalmeeyo dhinaca daneeyaha ah haddii adeegyada turjubaadda ee dheeraadka ka ah kuwa ay bixisay maxkamadda loo baahan yahay.

## VI. TURJUBAADDA FOGAANTA AH

**VI. A.** Turjubaadda fogaanta ah, oo ay kamid tahay turjubaadda taleefanka iyo ta maqal iyo muuqaalka ah, waxa loo adeegsan karaa si loogu fududeeyo galaangal helidda maxkamadda ee shakhsiyaadka aqoontooda Ingiriisidu ay xaddidan tahay si waafaqsan shuruudaha lagu sheegay halkan. Hawlaha la xidhiidha cadeymaha iyo tallaabooyinka kale ee dacwadeed ayaa ay qaban karaan maxkamaduhu iyaga oo adeegsanaya tiknoolajiyadda marka la heli karo si ay u bixiso adeegyo turjubaad luuqadeed ah oo hadal ah.

**VI. B.** Turjubaanka luuqadeed ee maxkamadda u hor yimaadda si fogaan ah waa in la ogolaadaa isla markaana loo eegaa dhammaan heerarka kale ee lagu xusay Hagahan waxaana loo magacaabi doonaa si waafaqsan Qaybta IV.C.

**VI. C.** Maxkamaddu waxa ay hubin doontaa in turjubaadda meesha kale jooga ay uu u hoggaansan yahay Hagahan iyo heerarka OLA, oo ay kamid yihiin heerarka xidhiidhka qarsoodiga ah, iyo inay u sahlayso madaxa garsoorka, dhinacyada, qareenada iyo markhaatiyada inay iyagu si cad isku maqlaan isla markaana u maqlaan turjubaanka iyo in awood loo yeesho in si saafi ah loo duubo.

## VII. TURJUBAADAHA

Turjubaadaha foomamka badanaa lagu adeegsado dacwadaha maxkamadda, bayaanada qoraalka ah ee aan Ingiriisida ahayn ee la siiyo maxkamadda, calaamadaha looga baahdo maxkamadda dhexdeeda, iyo wixii xidhiidh qoraal ah ee kale ee looga baahdo maxkamadda waxa loo buuxin doonaa si waafaqsan Siyaasadda Turjubaadda iyo Calaamadaha Laba Luuqadleyaasha ah ee OLA.

## VIII. BIXINTA KHARASHKA TURJUBAANADA IYO FASIRAYAASHA MAXKAMADDA

Turjubaannada iyo fasirayaasha luuqadeed ee ah qandaraaslayaasha madaxa bannaan waxa kharashkooda loo bixin doonaa si waafaqsan Siyaasadda Bixinta Kharashka Turjubaanka ee OLA. Madax garsoore ama shaqaale maxkamadeed toona ma qiimeyn doonaan kharashaadka adeegyada loo siiyo si waafaqsan hagahan dhinac daneeye ah ama shakhsiyaad qaata adeegyo luuqadeed muddada ay socdaan hawlgallada maxkamadda, mana dalban karaan in maxkamadda ama gobolka magdhaw laga siiyo kharashaadkaas shakhsiyaadka LEP ga ah.

## IX. WAXYAABAHA ANSIXINTA LOOGA LA NOQONAYO TURJUBAANNADA LUUQADEED

**IX. A.** Madax garsooreed ayaa ansixinta kala noqon doona turjubaan luuqadeed bilawga kiis ama inta lagu gudo jiro dacwad oo OLA ayaa turjubaan kala noqon doonta ansixinta turjubaadda hawlgallada maxkamadda ah markasta oo turjubaanku:

1. Awood uu u yeelan waayo in uu si wax ku ool ah ula xidhiidho shaqaalaha maxkamadda, dhinacyada ay khusayso, ama ka qaybqaatayaasha kale, oo ay kamid yihiin kiisaska uu turjubaanka isaga laftiisu uu sheego awood la’aantaas;
2. Yahay mid maslaxad ugu jirto meesha taas oo ay sabab u tahay xidhiidh uu la leeyahay qof ku lug leh arrinta ama maslaxad ugu jirto natiijada;
3. Jebiyo Xeerka Masuuliyadda Xirfadeed ee Turjubaannada Maxkamadeed ee Colorado; ama
4. Aanu haddeer ahayn mid loo ansixiyey in uu turjubo dacwadda ama hawlgalka maxkamadeed ee loo magacaabay taas oo ay sabab u tahay isbeddel ku yimid shahaadada, cadeynta aqoonta, xaaladda ama khibradda, ama tallaabo loo qaaday si waafaqsan Siyaasadda Anshax-marinta Turjubaanka Maxkamadda.

**IX. B.** Madaxa Garsooreed ayaa isla markaba gaadhsiin doona OLA markasta oo turjubaan luuqadeed laga la noqdo ansixinta dacwad isla markaana sharixi doona sababta kala noqoshada ansixinta.

**IX. C.** Marka madax garsooreed ama OLA ay kala noqoto ansixinta tujumaan, maxkamaddu waxa ay bixin doontaa turjumaan luuqadeed oo beddel ah.

## X. HANNAANKA CABASHADA

Qofkasta oo ka cadhaysan jebin la sheegtay oo hagahan ah waxa uu cabasho ka xareyn karaa OLA. Cabashadan waxa dib loogu eegi doonaa isla markaana loo baadhi doonaa si waafaqsan Habraacyada Ka Hawlgalidda Cabashooyinka Galaangal U Helidda Luuqadda ee OLA. Ma jiro wax halkan ku jira oo loo fasiran karo in uu ka joojinayo madax garsooreed in uu fuliyo hagahan inta lagu gudo jiro dacwad ama dib u eegis xigta oo ah dacwadda xadgudubku ka dhacay. Turjubaanka Maareynta ee maxalliga ah ayaa foomamka cabashooyinka ku diyaarin doona dhammaan maxkamadaha.

## XI. DOORARKA IYO MASUULIYADAHA SI LOO XAQIIJIYO GALAANGAL HELIDDA

**XI. A. Dhammaan Madaxda Garsooreed** waxa ay xaqiijin doonaan in shuruudadaha Hagahan la fuliyo dacwad walba.

**XI. B. Masuulka Maxkamadda Gobolka** ama wakiilkiisa ayaa, si waafaqsan shuruucda gobolka iyo tilmaamaha dheeraadka ah ee Gudoomiyaha Garsoorka, sameyn doona isla markaana maareyn doona shuruudo gobol oo jaango'an wixii la xidhiidha xogta luuqadda ee shaqaalaha maxkamaddu ay tahay inay ka ururiyaan dhinacyada daneeyeyaasha ah iyo shaqaalaha maxkamadda marka kiisaska la xareeyo, iyo wixii la xidhiidha siinta wargelin dhammaan dhinacyada ay khusayso oo la xidhiidha helitaanka adeegyada luuqadda.

**XI. C. Fulinta Maxkamadda** ama wakiilkiisa ayaa, si waafaqsan shuruudaha gobolka, maareyn doona siinta galaangal u helidda luuqadeed maxkamadaha ee ay siinayaan shakhsiyaadka LEP ga ah ee degmada ku sugan, ka ururin doona macluumaadka baahiyaha luuqadda dhinacyada daneeyeyaasha ah iyo shaqaalaha maxkamadda si waafaqsan heerarka OLA, muddeyn doona isla markaana isku duba ridi doona adeegyada turjubaanka luuqadda ee dhammaan dacwadaha maxkamadda, isla markaana fudaydin doona galaangal y helidda luuqadeed ee dhammaan hawlgallada maxkamadeed ee kale.

**XI. D. Guddoomiyaha Baroobeeshinka** ama wakiilkiisa ayaa maareyn doona siinta galaangal u helidda luuqadda adeegyada baroobeeshinka ee shakhsiyaadka LEP ga ee ku sugan degmo garsooreed kasta.

**XI. E. OLA** waxa ay:

1. U diyaarin doontaa maxkamadda, shaqaalaha maxkamadda, turjubaannada iyo dadweynaha siyaasadaha iyo habraacyada la xidhiidha ku bixinta galaangal helidda luuqadda maxkamadaha gobolka Colorado dhexdooda. Siyaasadahan iyo habraacyadan waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn, kuwa la xidhiidha qorshayaasha galaangal u helidda luuqadda, fasiraadaha, turjumaadda fogaanta ah, iyo turjumaadda faylasha dijitaalka ah ee dacwad maxkamadeed;
2. Kormeeri doontaa tababarka iyo imtixaanidda turjubaannada luuqadeed waxaana ay soo dhigi doontaa liisaska turjubaannada la ogolaaday ee shaqada ku jira websayt ka OLA si ay u fudaydiso adeegsiga turjubaanka luuqadeed ee ugu khibradda badan ee la heli karo; oo
3. Waxay bixin doontaa turjubaadaha foomamka inta badan ay adeegsadaan maxkamadaha iyo baroobeeshinka marka ay diyaar u yihiin in lasoo dhigo websayt ka rasmiga ah ee Waaxda Garsoorka ee Colorado si ay uga kaalmeyso dhammaan degmo garsooreedyada hawshooda ah galaangal siinta maxkamadaha iyo adeegyada baroobeeshinka ee shakhsiyaadka LEP ga.

**XI. F. Turjubaanka Maareynta ah** ayaa, si waafaqsan siyaasadda gobolka, u xaqiijin doona in calaamadaha lagu soo dhigo la xidhiidha helitaanka adeegyada turjubaanka Ingiriisi iyo luuqadaha inta ugu badan u baahan turjubaad iyo in dhammaan shakhsiyaadka LEP ga la siiyo wargelin ah helitaanka adeegyada turjubaanka marka kiis la bilaabo, ama si kale macquul ahaan kahor wakhtiga kama dambeysta ah ee hor imaadka maxkamadda ama qiraalka si loo fudaydiyo galaangal u heliddda maxkamadaha iyo adeegyada baroobeeshinka ee shakhsiyaadka LEP ga ah.

Dhaqangal noqonaya marka la saxeexo.

Lagu sameeyey Denver, Colorado maalintan 6aad ee Maarso 2023.

/s/

Brian D. Boatright, Gudoomiyaha Garsoorka